

# CODAYNTA IYADOO LAGU JIRO DIINWAANGALIN DEMBI



Diiwaankaaga dembi ma saameeyo xuquuqdaada codbixinta Minnesota ilaa aad xabsi ku jirto adigoo ku xukuman dembi weyn.

## CODAYNTA KA DIB XUKUN DEMBI WEYN

Laga bilaabo Juun 1, 2023, waxaad codeyn kartaa inta aadan xabsi ku jirin xukun dembi weyn, aad tahay muwaadin Mareykan ah, ugu yaraan 18 sano jir. Maalinta Doorashada, kuna nool Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.

## CODAYNTA KA DIB MARKA LA SOO CELIYO XUQUUQDAADA

Haddii aad xabsi ku jirtay xukun dembi weyn, waxaad codeyn kartaa marka xabsiga laga sii daayo. Marka xuquuqdaada codbixinta dib loo soo celiyo, waa inaad isdiiwaangelisaa si aad u codeyso. Waxaad iska diiwaangelin kartaa:

- Khadka internetka ee [mnvotes.gov/register](https://mnvotes.gov/register)
- Foomka warqadda ah, oo boostada loogu celiyo Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota ama xafiiska doorashada degmadaada
- Shaqsi ahaan xafiiska doorashada degmadaada

wuu sii socdaa dhinaca dambe...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota  
[mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) • 1-877-600-VOTE

### TAARIIKHAHA 2024

#### CODEE HORE

Janaayo 19 - Maarso 4

#### DOORASHADA

#### HORDHACA

#### MADAXWEYNAHA

Talaado, Maarso 5

#### CODEE HORE

Juun 28 - Agoosto 12

#### DOORASHADA

#### HORDHACA

Talaado, Agoosto 13

#### CODEE HORE

Septembar 20 -

Noofambar 4

#### MAALINTA

#### DOORASHADA

Talaado, Noofambar 5

# CODAYNTA IYADOO LAGU JIRO DIINWAANGALIN DEMBI

**VOTE**  
I WILL  
VOTE  
**2024**

...wuu sii socdaa laga soo bilaabo hore

## ***Ma codeyn karaa haddii...***

La igu soo oogay ama la igu xukumay dembi yar ama dembi weyn?	<b>Haa</b>
Waxaan ku jiraa xabsi, laakiin kuma jiro xukun dembi weyn oo hadda socda?	<b>Haa</b>
La igu soo oogay dembi weyn, laakiin weli lama i xukumin?	<b>Haa</b>
Waxaa la ii oggolaaday hakinta xukunka?	<b>Haa</b>
Waxaa lagu xukumay dembi weyn gobol kale laakiin hadda xabsi kuma jiro?	<b>Haa</b>
Waxaan ku jiraa xaalad tijaabo ah ama damaanad ka dib xukun dembi weyn?	<b>Haa</b>
Waxaa la igu xukumay dembi weyn waxaana hadda ku jiraa fasax shaqo?	<b>Haa</b>
Waxaan hadda ku jiraa xabsi anigoo ku jira xukun dembi weyn?	<b>Maya</b>



Iskaan koodhkan si aad u booqato  
mnvotes.gov una diiwaangeliso inaad  
codeyso!